

ACTION INFORMATION SHEET

Maxaa ka mid ah waxyaabaha loo qabto caruurta ku jirta Title I?

What Services May be Offered to Students in Title I Schools?— Somali Version)

Waa maxay Title I Skuul?

Title I waxa weeyaan barnaamij dawlada hoose maaliyad galisay. Waxana loogu talagaly ardayda looga cabsaniyo in ay dib u dhacaan. Waxa maaliyada Title I loogu talagaly caruurta dhaqaalaha ay ku nool yihiin aad u hoosayo

Mamulaha skuurka ayaa kuu sheegi kara in ilmahaagu ku jiro Title I.

Ardayda kaliya ma aha waxa hela kaadhka warbixinta (report card). Iskuuladaba waxa lagu qiimeeya kulba sida ay horumar u gaadhsiiyeen ardayda.

Sharci ka soo baxay dawlada dhexe oo loo yaqaan No Child Left Behind ayaa waxa uu dhigayaa in ay skuuradu fuliyaan waajibaad. Waajibaadkaana waxa loo yaqaan hor u marka macquulka ah ee sanadka (adequate yearly progress). Skuurada aan fulin waajibaadka waxa loo yaqaan “skuurada u baahan isbadal”.

Maxaa dhici karaa hadii skuurka Title I ee ilmahaagu uu dhigtaa noqdo “skuur u baahan isbadal” labo sano dabadeed?. Ilmahaagu waxa uu heli karaa laba caawimaad.

Taageerada iyo caawimaadka waxbarashda

Labada caawimaad mid ahaan waxa loo yaqaan “taageerada iyo caawimaadka waxbarashada”. Taas micnaheedo waxa weeyaan waxqabad dheerad ah sida qof wax u bara gaar ahaan (tutoring). Waxyaabaha laga caawiyo waxa ka mid ah akhriska, luqada, iyo xisaabta. Caawimaadka wakhtiyada la siiyo waxa ka mid ah iskuulka kadib, maalmaha sabbtida iyo axada, ama wakhtiga iskuulka la xidho. Waana lacag la'aan.

Yaa bixiya caawimaadka? Waalidku waxa ay ka xulan karaan kooxo badan oo ay wasarada waxabarashada ee Minnesota ay bixiso. Waxa aad kooxaha liiskooda waydiin karta maamulaha iskuulka. Waxa kale oo aad magaacda ka heli kartaa intarnatka qaybta <http://education.state.mn.us/mde/index.html>.

Doorashada iskuulka

Caawimaadka kale waxa loo yaqaan doorashada iskuulka (school choice). Taa micnaheedo waxa weeyaan in aad ilmahaaga gaysan karto iskuul kale. Waxa ay taasi kuu banaantahay marka iskuulku uu yahay mid u baahan in wax laga badlo ama amaan ahayn.

Waa in dagmada iskuulku kuu sheegtaa sanad walba in ilmahaaga u fasaxan tahay in uu tago iskuul kale. Waa in ugu yaraan laba iskuul oo kale kuu sheegaan. Waana in dagmado bixisaa wixii kharash ee ku baxa xaga gaadiidka. Waxa loo hormariyaa ardayda reerkoodu ay sabool (low income) yihiin hadii ay jirin dhaqaalo ku filan.

Su'aalo?

Hadii aad wax su'aal ah ka qabtid caawimaadka, waxa aad soo wacdaa xarunta waalidka minasoota (Minnesota Parent Center) talafoonka 952-838-9000 ama 800-53-PACER.

Waa maxa hor umarka loo baahanyahay ee sanadaka?

Gobol kasta, dagmada waxabarashada, iyo iskuulka ayaa sharci ahaan looga baahanyahay in ay muujiyaan hor umarka xaga waxbarashada. Hor umarka sanaku, adequate yearly progress (AYP) waa hab lagu qiyaaso heerka heerka loo baahanyahay. Hor umarkaana waxa lagu ogaada imtixaanada, sida imtixaanka lagu magacaabo basic skills test ama imtixaanka qiimaynta kartida iyo awooda.